



GOBOLKA WASHINGTON

ETV Barnaamijka
Education and Training
Voucher (Kaalmada
Waxbarashada iyo
Tababarka Ardayda
Ka Gudubtay Koriinka)

SIDEE ayaan u gali kara lacagaha ETV?

Marka lagu siiyo ETV, macluumaadka ayaa lagu soo diri doonaa iimayl ku saabsan sida loo helo lacagaha.

Si ka duwan noocyada kale ee gargaarka dhaqaale, ETV si toos ah **UGUMA** tago kulliyaddaada ama jaamacaddaada. Waxa aad si toos ah lacagaha ku heli doontaa jeeg ama deebaaji toos ah.


Dhammaan ardaydu waa inay buuxiyaan oo soo gudbiyaan **foomka Diiwaangelinta Bixiyaha Gobolka oo dhan**. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan nidaamada ka dhaafida, la xidhiidh Barnaamijka ETV.

Kala xidhiidh barnaamijka ETV

Barnaamijka Education and Training Voucher (Waxbarashada iyo Barnaamijka Tababarka Foojarka) (ETV)

Iimayl: etvwash@dcyf.wa.gov

Wabsaaytka: www.dcyf.wa.gov/services/education-for-foster-youth/etv



Aan kaa caawino inaad furto albaabo cusub

DCYF ma takoorto waxayna usiisaa helitaan siman barnaamijyadeeda iyo adeegyadeeda, dhamaan dadka iyadoon loo tixgalin isirka, midabka, jinsiga, diinta, caqiidada, xaalada guur, dhalashada, rabitaanka galmo, da'da, xaalad ciidan ama jiritaanka naafo jidheed, dareen ama maskaxeed.

Haddii aad rabto nuqullo dhukumenti ah oo qaab kale ah ama luuqad kale ah, fadlan kala xidhiidh DCYF Constituent Relations (DCYF Xidhiidhada Qeybaha) 1-800-723-4831 ama iimaylka communications@dcyf.wa.gov.



Macluumaadka Ardayda



WAA maxay Barnaamijka ETV?

Barnaamijka Education and Training Voucher (Kaalmada Waxbarashada iyo Tababarka Ardayda Ka Gudubtay Koriinka) (ETV) waxa uu siiyaa caawimo dhaqaale dhalinyarada xaqa u leh inay galaan kulliyad, jaamacad, kuliyad farsamo ama koolaj farsamo oo la aqoonsan yahay.

Abaalmarinta ETV waa mid u gaar ah arday kasta waxayna ku saleysan yihiin qaacidada kharashka kuliyada ama jaamacadda (COA), abaalmarinta kaalmada maaliyadeed, iyo baahida aan la daboolin ee ardayga.

Abaalmarinta ETV ee ugu badan sanad dugsiyeedkii waa \$5,000.

Si kastaba ha ahaatee, arday kastaa uma qalmo inuu helo qaddarka ugu badan. Abaalmarintu waxay ku saleysan tahay baahida aan la daboolin ee ardaygu taas oo ay go'aamiso kuliyaddooda ama jaamacaddooda.

SIDEE ayaan ku ogaanayaa inaan uqalmo?

Waxaa laga yaabaa inaad u qalanto inaad codsato barnaamijka ETV haddii aad buuxiso mid ka mid ah kuwan soo socda:

- Waxaad tahay 15 ilaa 20 jir, hadda ku lug leh tallaabada ku tiirsanaanta Gobolka Washington ama maxkamad qabiil, daryeelka iyo haynta DCYF ama hay'adda Indian Child Welfare (Daryeelka Carruurta ee Hindida) (ICW), iyo daryeelka korinta.
- Waxaad tahay 18 ilaa 20 jir oo waxaad tahay da'a ka baxday kaalmada gobolka ama ICW. Dhalinyaro ka baxday da'da daryeelka korinta gobol aan Washington ahayn ayaa laga yaabaa inay habboon yihiin in ay codsadaan.
- Waa lagu korsaday ama ay masuul kaa ahaayeen qaraabo markii ay jirtay ama ka dib da'da 15.
- Haddii aad ka qayb qaadatay oo aad heshay lacagaha ETV ka hor da'da 21, waxaa laga yaabaa inaad u qalanto ilaa da'da 26.

SIDEE ayaan u codsadaa?

Dhammaan codsiyada ETV waxa si onlaayn ah looga heli karaa:
www.dcyf.wa.gov/services/education-for-foster-youth/etv

IHaddii ay tahay:

MARKII KOOWAAD codsade, dhammaystir Codsiga Cusub.

SOO CELINTA codsada, dhammaystir Dib u Cusboonaysiinta Codsiga.

ARDAYGA HADDA RABA IN UU ISQORO* ama ardayga diwaangashan **BARNAAMIJKA LABADA DHIBCOOD**, dhammaystir Codsiga Barnaamijka Ardayda loo ogol yahay inay isku dhigtaan Koolajka iyo Dugsiga sare.

Tusaalayaasha qaar kamid ah kharashaadka Waxbarasho ee ay dabooashay Barnaamijka Bilaabista/Ardayda loo ogol yahay inay isku dhigtaan Koolajka iyo Dugsiga sare ee haddu waa:

- Buugaagta iyo agabka
- Tigidhka baska AMA lacag celinta shidaalka
- Khidmooyinka.

WAA HADMA wakhtiga kama dambaysta ah ee codsigu?

Wakhtiga kama Dambaysta ah ee Tixgalinta: Jeeniwari. 1 ilaa Abril. 30

Ardayda waxaa lagu dhiirgelineyaa inay codsadaan wakhti kasta inta lagu jiro sanadka.

*Majiro wax wakhti kama dambays ah oo loo qabtay Barnaamijka Bilaabista Hore/Ardayda loo ogol yahay inay isku dhigtaan Koolajka iyo Dugsiga sare.

WAA maxay masuuliyadahaygu?

Ka qaybgale barnaamijka ETV ahaan, waxaad masuul ka noqon doontaa:

- Inaad akhrido, saxeeexo, oo soo celiso Heshiiska Ka-qaybgalka.
- Si joogto ah aad u hubiso iimaylkaaga.
- Soo ogaysiiso shaqaalaha ETV macluumaadkaaga halka lagaala soo xidhiidhayo, kaalmada dhaqaale, ama isbedelka heerka isdiiwaangelinta.
- Buuxi Satisfactory Academic Progress (Horumarka Waxbarasho ee Ku Qanacsanta) (SAP) kuliyadaada/jaamacadaada iyo Xawliga Shuruudaha Horumarka adiga oo helaya 2.0 GPA ama wixii ka sareeya.
- Soo gudbi jadwalkaaga fasalka bilowga xilli kasta iyo qoraaladda aan rasmiga ahayn ee dhamaadka xilli kasta.
- Isdiwaangali ugu yaraan marka wakhtigu yahay kala badh ama ka badan (lix dhibcood ama ka badan).



MUXUU daboolayaa Barnaamijka ETV?

- Kharashka
- Daryeelka Ilmaha.
- Buugaagta & Agabka.
- Gaadiidka
- Caymiska
- Dibada Wax Kubaro
- Sooftiweerka Shaqaynaya
- Koombiyuutar & Daabace
- Shidaal
- Kirada & Deebaajiga
- Dayactirka
- Laydhka iyo biyaha
- Hagaajinta
- Taleefoon
- Waxbarashada
- Cuntada & Nadaafada Shakhsi
- Labbiska ama Dharka loo baahan yahay

Lacagaha ETV waxa kale oo loo isticmaali karaa beddelka deymaha